

6 ISKU DIIWAANGELINTA KULLIYADA: ILAHA KULIYADA EE AAD U BAAHANTAHAY INAAD ISTICMAAHSO

Kulliyadaha waxay bixin karaan ila badan si ay kuu caawiyaan adigu inaad noqoto mid guulaysta. Dhammaan waxa ku jira **kharashkaaga waxbarashada** iyo **kharashyada**, markaas isticmaal iyaga!

XAGEEN U DOONTAA TAAGEERADA TACLIINTA?

La talinta kulliyadaha: Waxa uu caawiyaa fahanka nidaamyada tacliinta kulliyada, doorashada iyo codsiga **maadaha ahmiyada la saaro** iyo helida **ilaha** goobta jaamacada.

Maktabadaha: Waxa uu bixiyaa meelo waxbarasho oo kala duwan halkaas oo aad ka heli karto caawimada cilmi baadhida iyo la shaqaynta kuwa kale.

Xarumaha waxbarida gaarka ah: Waxay caawimo ka bixisaa maadooyinka sida qoraalka iyo xisaabta ee filkaaga.

Saadaha shaqada: Wakhtiyada marka **barofosooradaadu** la hgelgi karo inay ka jawaabaan su'aalaha aad hayso ee ku saabsan fasalka.

XAGEEN KA HELI KARAA TAAGEERO LA GAARYEELAY?

Xarunta mihnada: Waxay ku siisaa la talinta mihnada iyo caawimada horumarinta khibrado shaqo, qoraalka faahfaahinta shaqo doonimadaada iyo u diyaar garowga waraysiga shaqada.

Xarunta Kala duwaanshaha/dhaqanada badan: Meesha ardayda midabka iyo bulshooyinka kale si loo helo taageerada bulshadda iyo dareenka oo waxay dareemaan badbaado si loo muujijo fikradahooda iyo khibradaha.

Adeegyada la talinta: Waxay adiga ku siisaa la talinta qarsoodiga ah iyo taageerada caafimaadka masxkada.

Ilaaha naafada: Waxay siisaa habbaynta macquulka ee tacliinta ardayda u qalanta.

Macluumaadka teknoolajiga (IT): Waxay bixisaa adeegyada teknoolajiga ka duwan oo waa meesha ugu horaysa ee codsiyada la xidhiidha teknoolajiga goobta jaamacada.

Adeegyada ruug cadaaga: Waxay u shaqaysaa sidii isku xidhaha Waaxda Arrimaha Ruug cadaaga oo waxay caawisaa wareegida dadkii ciidaha hore ahaan jiray ee ka wareegaya ciidanka ilaa noloshu tacliinta.

KAALMADA DAHQAALAHA IYO TAAGEERADA DEEQDA WAXBARASHO?

Xafiiska kaalmada dhaqaale: Waxa uu kaa caawiyaa inaad fahanto **kaalmada dhaqaale** abaal marinta oo waxa uu bixiyaa macluumaadka ku saabsan ilaha maalgelinta dheeraadka ah oo waxa uu kaa caawiyaa inaad raadiso oo codsato **deeqaha waxbarashadda**.

HALKEEN KARAA ANIGU INAAN KA QAYB QAATO?

Ururka ardayda: Waxa uu bixiyaa meelo, dhacdooyinka, kooxaha waxbarasho iyo deegaan raaxo leh halka aad ku xidhmi karto kulliyada bulshadda.

Noloshu ardayga: Waxay bixisaa fursado badan oo goobta jaamacada ah.

Xafiiska waxbarashadda dibada: Waxay siisaa khibrado safar caalami ah oo macni buuxa leh buundada kulliyada.

Xarunta raaxaysiga iyo barnaamijyada: Kulliyado badan waxay leeyihiin jiimka, garoomada ciyaaraha, fasalada jidh dhiska ama naadiyada ciyaaraha.

MAAYO: FASALKA 12

